



Wararkii Ugu Dambeeyey xanuunka Coronavirus PPS: Guddoomiyaha Gobolku Wuxuu Amray In Iskuuladu Xirnaadaan ilaa iyo Bisha Abriil 28keeda

Gacaliye Waalidiinta iyo Shaqaalaha PPS,

Galabta ayaa Guddoomiyaha Gobolka Kate Brown, waxa ay soo saartay qeyb ahaan Amar Wareegto ay kaga jawaabeyso xaalada gobolkeenu ku sugan yahay ee cudurka COVID-19, sidaas darteed waxa ay shaacisay in la kordhiyey waqtigii ay iskuuladu xidhnaanayeen gobolku sida uu dhan yahay. Ogeysiiska waxaa ku jiraan:

Dhammaan Gobolka Oregon iyo dhammaan iskuuladaa PPS waxa ay xirnaan doonaan ilaa bisha Abriil 28keeda. Iyada oo la raacayo amarka wareegtadani, ardaydu waxa ay iskuulada ku soo noqon doona maalinta Arbacada ee bisha Abriil tahay 29ka.

Waxaa jira dhowr arrimood oo ka mid ah amarka Guddoomiyaha Gobolka Brown oo aan hadda qiimeyneyno oo Waaxda Waxbarashada Oregon ay caddeyn doonaan. Waxa aan sii wadi doona in aan isha ku hayno qorshaha waxa soo kordhaya waqtiga fog sidii ardayda loo gargaari lahaa sidii ay casharadoodii waxbarashada ugu qaadan lahaayeen iyaga oo jooga guryahooda inta iskuuladu xiran yihiin

Waxa aan ka warqabnaa in xiritaanka iskuuladu uu culeys ku keenayo gaar ahaan qoysas fara badan. Waxa aan ka shaqeyneynaa in aan isku dayno dugsiyada degmada oo dhan sidii loo yareyn lahaa qeybo ka mid ah dhibtaasi.

Haddii aan tusaale ahaan u soo qaadano, fadlan waxaad sii wadaa in aad booqoto shabakadani pps.net/coronavirus si aad uga hesho fariimaha dugsiyada degmada, macluumaad ku saabsan cuntada iyo gargaarada kale ee ardayda iyo qoysaskooda u baahan yihiin, macluumaadka ku saabsan sida loogala hadlo caruurta waxyaabaha ku saabsan cudurka fayriska ah iyo waxyaalada uu geysanayo, iyo waliba linkisyada hay'adaha caafimaadka dadweynaha. Kumanaan ardayda ayaa ka qeybqaatay maalintii ugu horeysay iyaga oo helay quraaca iyo/ama qado 15 goobood oo cuntada lagu qeybinayey

Waxaan sidoo kale idinku dhiirigelineynaa in qof kasta oo bulshada ka mid ahi inuu sii wado inuu raaco tallo soo jeedinta fiican ee ay ka mid tahay in ururka bulshada la yareysto (taasi oo macnaheedu yahay in la xadido waqtiga waalidka iyo caruurta ay ciyaaraan iyo in guryaha dhexdooda lagu kulmo), in si joogta ah gacmaha loo dhaqa, iyo in aad dabooshaan afkiina marka aad qufaceysaan ama aad hindhiseysaan. Qolyihiina isku arka astaamaha hargabka ama ifilada waa in aad guryaha iska joogtaan ilaa ay astaamahaasi idinka tagayaan muddo ku siman 72 saacadood. Haddii aad ka walaacdo astaamahaasi, fadlan waxaad la tashataa takhtar.

Waxaan idiinka mahadcelineynaa sida aad noo fahmeysaan waqtigan xaaladu isbedeshay ee aan ku jirno. Macalimiin ahaan, hamigayagu wuxuu yahay mar kasta sidii aan halka ugu sareysa u gaadhsiin lahayn waqtiga wax la baranayo sidoo kalena aan aad u yareyn lahayn in

waxbarashada hakad ku yimaado. Sida cad, qalalaasahani wuxuu inooga baahan yahay in aan u hawlgalno si ka duwan sidii aan awal u hawlgali jirnay. Fadlan waxaad nagala socotaan wixii dheeraad ah soo kordha ee ah tallooyin sidii aan ku caawin lahayn ilahaagu inuu guriga casharadiisii ku qaato.

Waad mahadsan tihiin.